

Qoysaska Dugsiga Sare Ee Highland Park,

Waxaan idinla wadaagayaa fursad loo hayo ardayda dhigato Dugsiga Sare Ee Highland Park oo ay soo kabi karaan dhibcaha rubucii koowaad ee sannad-dugsiyeedka intii ay socotay waxbarashada durugsan (distance learning).

Iyadoo la eegayo wixii carqalado ah ee ay ardaydu weli kala kulmayso waxbarashada durugsan, degmada Saint Paul Public Schools waxay fursad siin dhammaan ardayda dugsiga sare **oo hal ama fasallo badan ka helay buundo ah NP (ma baasin) rubicii koowaad iyagoo helayo buundo ah D rubuca koowaad haddii ay rubuca labaad helaan buundo baasitaan ah.**

Buundo walba ee baasitaan ah ee u dhaxeeyso A+ ilaa D- markii la galo rubuca labaad waxay sababaysaa in ardaydu helaan buundo ah D rubucii koowaad.

Fadlan weyddii ilmahaaga inay la xiriiraan macallinkooda ama la-taliyahooda si loo xaqiijiyo inay helaan buundo baasitaan ah rubuca labaad ee iskoolka si ay uga soo kabtaan dhibcihii laga doonayay qalin-jebinta ee ka lumay rubucii koowaad. Isha ayaynu ku hayn doonnaa buundada ardayda iyo meesha ay waxbarashadu u marayso si ardaydu ay koorsooyinka guul ugu dhammeeyaan. Wixii caawinaad dheeraad ah ee ardaygu helayo inta sannad-dugsiyeedku socdo waa loo soo sheegi doonaa waalidka.

Isbeddelladaan buundooyinka ee rubuca koowaad waa isku day la isku deyayo in la helo qaab buundo-bixin oo sinnaan ku saleysan. Waynu fahansannahay in waxbarashada durugsan oo uu weheliyo walaaca ka imaanayo saf-markan aynu ku jirno ay culeys kuhayso ardaydeenna.

Inkastoo ay degmada SPPS isku dayayso inay buuxiso baahiyaha dhammaan ardayda xilligan culeyskiisa goonida ah wato, **misana waxaynu si gooni ah diiradda u saaraynaa caawinta ardayda dugsiga sare maadaama wakhtiga ay ku qalin-jebin karaan xilligii la rabay uu kooban yahay.**

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan igala soo xiriir 612-227-3933. Waad ku mahadsan tahay sida aad u garab taagan tahay ilmahaaga iyo Dugsiga Sare Ee Highland Park.

Mahadsanid,

Cabdisalaam Adam, Maamule Ku-Xigeen
Dugsiga Sare Ee Highland Park